Macluumaadka Bulshada

Falanqaynta siyaasadaha, nidaamyada iyo tababarka CPD

16 ka Juun, 2020

Dulmar Guud

Hordhac

Waaxda booliska magaalada Chaska waxa ay aqoonsan tahay ahmiyadda lama huraanka ah ee kalsoonida ka dhaxaysa shacabka iyo waaxda booliska, taas oo u shaqaysa asaas u ahaanshaha sharciyadda iyo awoodda fulinta qaanuunka. Waxa aanu qiimaynaynaa iskaashiga, xidhiidhka, iyo dedaalada wada shaqayneed ee aanu kala yeelano xubin kasta oo ka mid ah bulshadeena horumarinta hawlgalkeena ammaanka dadweynaha.

Maalin Isniin ah, 25 kii May, 2020, noloshii George Floyd si dhibaato leh bay ugu dhamaatay qaab argagax leh. Laga bilaabo wakhtigan, wada hadal qaranka oo dhan ah ayaa dib u soo cusboonaaday oo ku saabsan booliska; oo gaar ahaan diiradda saaraya hawlaha, tababarka, siyaasadda, iyo mawduucyada kale ee booliska. Wada hadalkani waxa uu ku baaqay dib u habayn boolis oo laxaad leh waxana uu adkeeyey baahida loo qabo falanqayn faahfaahsan oo ku saabsan nidaamyada iyo tababarka booliska.

Maanta aad ayaa ay uga muhiimsan tahay wakhti kasta oo hore, hay'adaha boolisku waa in ay la shaqeeyaan bulshooyinkooda oo ay si wada jir ah ugala shaqeeyaan dib u eegidda siyaasadaha iyo nidaamyada jira. Waaxda booliska ee Chaska waxa ay sii wadaa in ay aqbasho xidhiidhka wax ku oolka ah iyo iskaashiyada shaqada ee ay la leedahay qof kasta oo ka mid ah bulshadeena. Waxa aan rajaynayaa falanqaynta iyo macluumaadka bulshada ee ku jira warbixintan in ay adkeeyaan balanqaadkayaga ah in aanu ka dhinac shaqayno bulshadayada oo aanu cadayno qaababka aanu ku horumarin karno ammaanka dadweynaha ee bulshadayada, anaga oo xoojinayna iskaashiga jira.

Ujeeddo

Warbixintani waxa ay ka kooban tahay falanqayn faahfaahsan oo ah nidaamyada, siyaasadaha, iyo tababarka loo xulay waaxda. Aagagga diiradda la saaray waxa ka mid ah:

- ✓ **Siyaasadda iyo tababarka adeegsiga Xoogga**
- ✓ **Siyaasadda iyo hababka Kamaradda Lagu Xidho Jidhka (BWC)**
- ✓ **Siyaasadda iyo hababka Cabashada Muwaadinka**
- ✓ **Siyaasadda iyo hababka Booliska Eex-la'aanta ah♦**
- ✓ **Siyaasadda Shuruucda Anshaxa Booliska Chaska**

Aag kasta oo ka mid ah diirad-saaridda siyaasadda waxa ka mid noqon

doona soo koobid siyaasadda imika jirta ah, oo ay weheliso meelaha ay ku xoogan tahay oo la muujiyey siyaasad kasta oo jirtaa. Sidoo kale waxa la caddeyn doonaa aagagga suuragalka ah in laga badalo siyaasad kasta oo jirta. Waxa halka dambe lagaga dari doonaa qoraal dheeraad ah si loogu ogolaado in la muraajeceeyo dhamaan siyaasadaha CDC ee la soo xusay oo ay la socdaan siyaasadaha tusaalaha ah ee hadda jira ee Tababarka iyo Heerarka Askariga Nabadda (POST) ee Minnesota, markii la dabaqi karo

Eegitaan Degdeg ah oo Nidaamka ah:

Warbixintan iyo nidaamka ku xiga ee jawaab celinta bulshadu waa tallaabada koowaad ee joogtayntayada la shaqaynta qof kasta oo ka mid ah magaaladayada si aanu wax uga qabano walaacyada oo aanu xoojino fahamkiina hawl-galadayada hadda. Tallaabadan koowaad waxa ay qayb ka noqon doontaa dedaal ka ballaadhan kaas oo ay ka mid yihiin:

- ✓ **Falanqaynta hawl-gallada iyo siyaasadaha hadda**
  - o **Gude ahaan**
  - o **Ku lug-lahaanshaha iyo jawaab-celinta bulshada**
  - o **Falanqanta iyo doodaha heer gobol**
- ✓ **Aqoonsiga aagagga isbeddelka**
  - o **Gude ahaan**
  - o **Ku salaysan jawaab-celinta bulshada**
  - o **Falanqaynta khayraadka**
  - o **Sharci-dejinta ama waajibaadka guddiga POST**
- ✓ **Dhaqan-gelinta Isbedelka**
  - o **Siyaasad & habraac**
  - o **Tababarka shaqaalaha & khayraadka**
  - o **Cusboonaysiinta bulshada**
- ✓ **Falanqaynta socota iyo iskaashiyada bulshada**

Jadwal-wakhtiyeed Degdeg ah

- ✓ **Salaasada 6/16/20: Sii daynta warbixinta Macluumaadka Bulshada**
- ✓ **Ka dib 6/16/20: Magaaladu waxa ay bilaabaysaa in ay ka hesho jawaab-celin qoran bulshada**
- ✓ **Arbacada 6/24/20: Wada hadalka Bulshada Chaska**
- ✓ **Taariikhda TBD: Wada hadalka Bulshada Chaska ee ku salaysan wabsayt**
- ✓ **Dib-u-eegista jawaab-celinta iyo falanqaynta socota**
- ✓ **Dhacdooyinka iyo cusboonaysiinta kale TBD**

Hawlgalka iyo Qiyamka CPD

Xubnaha waaxda Booliska Chaska waxa ay u han wayn yihiin in ay u adeegaan bulshadeena. Waxa naga go'an dhisitaanka kalsoonida dadweynaha anaga oo u marayna barnaamijyada iyo iskaashiyada bulshada, heer sare oo xirfadeed, iyo diirad saaridda adeega macaamiisha.

Waxa aanu fahansanahay in aanu kaalin muhiim ah ka ciyaari karno kobcinta bulsho uu qof waliba dareemayo soo dhaweyn iyo ammaan. Waxa naga go'an in aanu siino adeegyada ammaanka bulshada oo tayo leh qof kasta oo ku nool, ka shaqeeya, ama soo booqda magaaladayada.

Bayaanada aragtidayada iyo hawl-galkayagu waxa ay u shaqeeyaan sidii heerar hagaya sidii aanu u qaabayn lahayn tusaalayaasha adeegayaga iyo go'aan-qaadashadayada. Qiyamkayaga aasaasiga ahi waxa ay ka dhisayaan tiirar maamul oo asluubta shaqaalaha ah dhamaan aagagga masuuliyadda.

Bayaanka Hawl-galka:

Adeeg. Ilaali.

Bayaanka Higsiga

Waaxda booliska Chaska waxa ay bulshada ugu *Adeegtaa* horumarinta xidhiidhada iyo iskaashiyada. Shaqaalahayaga waxa ka go'an nidaamka booliska ee ku wajahan xallinta mashaakilka kaas oo gacan ka geysta dhismaha bulsho ku salaysan xalal. Waxa aanu *Ilaalinaa* nolosha iyo hantida waxana aanu u xoojinaa ammaanka iyo tayada nolosha qof kasta oo ka mid ah bulshada.

Qiyamka Aasaasiga ah

- ✓ ***Ixtiraam*** **– Waxa aanu nolosha u haynaa tixgalinta ugu saraysa. Waxa aanu qof walba kula dhaqanaa sharaf iyo ixtiraam waxana aanu ku sugnaanaa caddaalada iyo eex la'aanta marka aanu gudanayno waajibaadkayaga. Xubnaha waaxdu waxa ay ula dhaqmaan dadweynaha iyo iyaga dhexdoodaba si xushmad iyo xirfadi ay ku jirto. Waa waajibkayaga in aanu ku kasbano kalsoonida dadweynaha erayo iyo ficilo is daba joog ah.**
- ✓ ***Degdeg-u-falcelinta*** **– Urur ahaan, waxa naga go'an in aanu buuxino baahiyaha bulshadayada. Waxa aanu aqoonsanahay in xubin kasta oo ka mid ah bulshadayadu laga yaabo in ay leeyihiin baahiyo, qiyam, iyo aragtiyo kala duwan. Waxa aanu ku dhisaynaa**

kalsoonida shacabka qaababka aanu u dhegaysano, ula socono, oo u taageerno kuwa aanu u adeegno.

- ✓ ***Xirfadda*** **– Shaqaalaha waaxda waxa loo hayaa heerarka xirfadeed ee ugu sarreeya. Waxa aanu u isticmaalnaa dhaqanada ugu wanaagsan ee fulinta sharciga si aanu ugu gudano waajibaadkayaga si daacadnimo iyo naxariisi ku jirto. Dhamaan tababarka, nidaamyada, iyo heerarka waaxdu waxa ay muujiyaan sida ay nooga go'an tahay ilaalinta sharafta iyo nolosha aadanaha. Waxa aanu dejinay yoolal si aanu uga caawino ururkayaga koritaanka ashkhaas ahaan iyo xirfadleyaal ahaan.**
- ✓ ***Hogaaminta*** **– waxa aanu aqoonsanahay oo aanu aqbalaynaa masuuliyadayada si aanu u noqono hogaamiyeyaal, bulshada dhexdeeda iyo facayaga dhexdoodaba. Waxa aanu masuul ka nahay waxqabadka, sumcadda, iyo kalsoonida waaxda. Waxa aanu ku dedaalnaa in aanu ugu adeegno dadweynaha qaabab dhisaya ixtiraam iyo is-fahan la is weydaarsado oo dhex mara waaxdayada iyo bulshada.**

Siyaasadda CPD: Adeegsiga Xooga

Hordhac

Dhamaan hay'adaha booliska ee gobolka Minnesota waxa laga dalbanayaa in ay lahaadaan siyaasadda adeegsiga xoogga. Siyaasadahan waxa loogu talagalay in ay hagaan filashooyinka maamulka iyo tababarka wixii la xidhiidha adeegsiga sharciga ah ee xoogga iyo cudur daarka sharciga ah ee adeegsiyada xoogga ee xeerarka gobolka Minnesota. (Eeg qoraalka dheeraadka ah ee u dambeeya 1: Siyaasadda CPD iyo qoraalka dheeraadka ah ee u dambeeya 2: siyaasadda tusaalaha gobolka)

Meelaha Ay Ku Xooggan Tahay Siyaasadda Hadda

- ✓ **Waxa ay aqoonsataa oo ay ixtiraamtaa qiimaha iyo sharafta gaarka ah ee nolol kasta oo aadane.**
- ✓ **Askartu keliya waxa ay u adeegsan doonaan xoogaas kaas oo macquul ahaan lagama maarmaan ah si ay gacanta ugu dhigaan dhacdo qaab wax ku ool ah**
- ✓ **Askarina uma banaana duruuf kasta oo jirta in uu sii wado adeegsiga xoogga (marka laga reebo keliya qabashada jidh ahaaneed) oo ka dhan ah shakhsi joojiyey in uu iska caabiyo**

- ✓ **Waxa uu u aqoonsadaa toogashada gawaadhida socota arrin asal ahaan khatar ah, xataa marka la dabbaqayo xoogga wax dila**
- ✓ **Shuruudaha iyo dib-u-eegidda warbixinta ee jira ee dhamaan adeegsiyada xooga**
- ✓ **Waxa ay dhistaa borotokoolada baadhitaanka –gude ahaan ama hay'ad debedda ah**
- ✓ **Waajibka faragelinta-sida ku jirta Amarka Guud ee 14, "sarkaalka faragalinayaa waxa uu u aaminsan yahay si shaki la'aan ah in caddaalad darrada muuqataa ay ka dhalan karto guuldarrada in la qaado tallaabo degdeg ah"**

Aagagga Isbedelka ee Suuragalka ah

- ✓ **Mamnuucid gaar ah oo ku saabsan dhamaan wixii cunaqabad/ xakamaynaha qoorta ah**
- ✓ **Si toos ah u geli luuqadda " waajibka faragelinta" siyaasadda adeegsiga xooga**
- ✓ **Ku celinta qaabka luuqada/yareynta madmadawga dib-u-eegidda Adeegsiga Xooga awoodda uu u siiyey kormeerka/shaqaalaha taliska**

Macluumaadka Tababarka

CPD du waxa ay haysataa cutub tababar oo firfircoon kaas oo ugu tababara si buuxda oo firfircoon askarta Adeegsiga Xooga iyada oo la raacayo tilmaamaha gobolka iyo waaxda. Gaar ahaan tababarka Adeegsiga Xooga, waxyaabaha soo socda ayaa lagu dabaqaa:

- ✓ **Ikhtiyaaro aan waxba dilin oo kala duwan ayaa ka dhex jira CPD; oo ay ku jiraan aaladaha Taser, PepperBall, iyo BolaWrap. CPD waxa ay ahayd hay'adii ugu horaysay ee gobolka dhexdiisa ah ee dhaqan galisay aaladda BolaWrap.**
- ✓ **Wiiqitaanku waa mudnaanta tababarka iyo filashada in lagu adeegsado goobta**
- ✓ **Cunaqabadka iyo xanibaadaha qoorta nooc kasta oo ay yihiin ma baraan mana ogola maamulka iyo tababareyaasha Adeegsiga Xooga ee CPD**
- ✓ **Kordhinta Adeegsiga Xooga waxa si firfircoon u adeegsada una sharraxa tababareyaasha CPD.**

Falanqaynta socota ee nidaamyada tababarka waaxdu waa ay socotaa, taas oo ay ka mid tahay tababar dheeraada oo ah faragalinta dhibaatooyinka, wiiqitaanka, iyo hawlaha kale ee la xidhiidha. CPD waxa ay ahaanaysaa mid ay ka go'an tahay in ay si joogto ah u qiimeyso nidaamyada hadda iyo sida hagaajin loo samayn karo markasta oo ay suuragal tahay.

Siyaasadda CPD: Kamaradaha Jidhka Lagu Xidho

Waaxda booliska ee Chaska waxa ay si firfircoon u adeegsadaan BWC yada waxana lagu baahiyaa garoonka. Ujeedada koowaad ee adeegsiga BWC waa in ay sawiraan cadaymaha ka soo baxaya kulanada booliska iyo muwaadiniinta. CPD waxa ay leedahay siyaasad la waajibiyey oo la xidhiidha isticmaalka askariga ee BWC yada (eeg qoraalka dheeraadka ah ee u dambeeya ee 3), kaas oo si ballaadhan ugu salaysan bixinta siyaasadaha/qawaaniinta lagu taliyey.

Meelaha Ay Ku Xoogan Tahay Siyaasadda Hadda

- ✓ **Waxa ay dhistaa tilmaamaha iyo barnaamijka BWC ee askartu ay u adeegsadaan**
- ✓ **Helitaanka iyo dib-u-eegida kormeerka ee muuqaalka BWC**
- ✓ **Waxa la shiday qaybta "Duubista hore" oo laguna sheegay siyaasada**
- ✓ **Asturnaanta xogta ayaa waxa damaanad qaaday siyaasada sida ay dhigayaan tilmaamaha iyo sharciga gobolku**
- ✓ **Hanti-dhawrka dibadeed ee labadii sanadka sida gobolku u oggolaado**

Aagagga Isbedelka ee Suuragalka ah

- ✓ **Dib-u-qeexidda "xidhiidhka muwaadinka ee guud" si meesha looga saaro madmadawga ku jira qaabka duubista ikhtiyaariga ah**
- ✓ **U awood siinta askariga khayraadka dugsiga in uu adeegsado isaga oo la tashanaya degmada dugsiga**
- ✓ **Dib-u-eegista ikhtiyaarka askarigu uu ku duubayo xaaladaha "daryeelka caafimaad"**
- ✓ **Tixgalinta nidaamka rasmiga ah ee dib-u-eegista muuqaalka / qof shaqaale ah oo cayiman**

Siyaasadda CPD: Cabashada Muwaadinka

Siyaasad firfircoon ayaa ka dhex jirta Waaxda Booliska Chaska taas oo dhista nidaamyo iyo borotokoolo loogu talagalay marka cabashada muwaadinka loo gudbinayo hay'ada (eeg qoraalka dheeraadka ah ee u dambeeya ee 4). Qof kasta oo doonaya in uu keeno cabasho ka dhan ah shaqaale ka tirsan hay'adda waxa la siin doonaa foomka cabashada muwaadinka. Haddii ay dhacdo qofka cabanayaa in uu ahaado mid qarsoon ama uu diido in uu buuxiyo foomka isla markaana macluumaadku ay u muuqdaan kuwo la rumaysan karo, taliyaha booliska ayaa gali kara booska qofka cabanaya. Ka dib marka cabashada la qabto, baadhitaan gudeed ayaa la bilaabayaa. Baaxadda iyo nooca baadhitaankani waa ay kala duwanaan doonaan iyada oo ku salaysan nooca cabashada. Xaaladaha u baahan baadhitaan rasmi ah, waxa laga qaadan doonaa go'aan ku salaysan nooca cabashada iyo xaqiiqooyinka la og yahay ee la heli karo in baadhitaan lagu sameeyo gudaha ama la kaashado hay'ad debedda ah. Qaar ka mid ah qodobada suuragalka ah ee ka mid ah go'aan qaadashadan waxa ka mid noqon kara in cabashada laga yaabo in ay ku eedaynayso ficillo dambiyeed, nooca eedaha, darajada iyo jagada xubinta la eedeeyey, iyo/ama qodobo kale. Iyada oo ku salaysan natiijooyinka baadhitaanka, cabashada waxa loo arki karaa in beri laga yahay, aan la sii wadayn, ama la sii wadayo. Wixii la xidhiidha cabashooyinka keenaya anshax-marinta rasmiga ah, Taliyaha Boolisku waxa uu soo saari doonaa Natiijooyinka Xaqiiqda oo qoran tallaabo lagama maarmaan ahna waa laga qaadi doonaa, hadba sidii loogu arko in ay munaasab ku tahay isugeynta duruufaha.

Meelaha Ay Ku Xoogan Tahay Siyaasadda Hadda

- ✓ **Siyaasadu waxa ay dhistaa habab cadcad oo loogu talagalay ka shaqaynta iyo ka jawaab-celinta cabashooyinka**
- ✓ **Waxa ay leedahay farsamo lagu ogolaanayo cabashooyinka hay'adaha ka dhexeeya iyada oo aanay jirin cid cabanaysa oo debedda ah**
- ✓ **Cabashada waa in loola tacaalaa qaab degdeg ah oo caddaalad ah**
- ✓ **Faahfaahinta shaqada baadhaha markii la dabaqi karo gudo iyo debedba**
- ✓ **Waxa ay raacdaa tilmaamaha iyo shuruucda Nidaamka Ilaalinta Xuquuqda Qofka ee loogu talagalay shaqaalaha anshax-xumada lagu eedeeyey**

Aagagga Isbedelka Suuragalka ah

- ✓ **Dib-u-qoridda "ujeeddada" siyaasadda si loo tirtiro xukunada fiirsi la'aanta ah oo ay tahay in cabashada lagula tacaalo "tallaabo sixitaan,"**
- ✓ **Soo dhig foomka cabashada muwaadinka khadka tooska ah si markaa si fudud loogu heli karo oo ay la socoto sharaxaadda su'aalaha iyo nidaamyada badanaa la is weydiiyo**
- ✓ **Dib-u-qorista siyaasadda si loogu daro nidaamka kala-soocidda dhamaan foomamka cabashada ee lagu qabtay hababka u dhigma baadhitaanka nooc kasta oo kala-soocidda cabashada ah**
- ✓ **Caddaynta hababka ku wargelinta dadka cabanaya qaabka ay u nidaamsan yihiin cabashooyinka, iyada oo la raacayo dhamaan shuruudaha iyo qarsoonida nidaamka ilaalinta xuquuqda qofka**
- ✓ **Qiimaynta isbedelada heer gobol ee suuragalka ah ee ku saabsan wargelinta cabashooyinka ka dhanka ah askarta oo loo dhaqan galiyo hadba sidii loo dabaqi karo**
- ✓ **Ku samaynta dib-u-eegis gudaha ah dhamaan cabashooyinka la qabtay qaab sanadle ah**

Cabashooyinka Muwaadinka: Macluumaad Dheeraad ah

***Sidee baa aynu ula tacaalaynaa anshax-marinta gudaha hay'addeena*?**

Marka la eego kusoo rogidda anshax-marinta, waa xaalad dhab ahaan ku salaysan mushkiladda iyo anshax-xumada kasta ee la wajahayo. Haddii walaacyadu kor ugu kacaan illaa heerka anshax-xumada ama wax dambi ah, nidaam rasmi ah ayaa la raacayaa. Tan waxa ka mid noqon kara baadhitaan gudeed, shuruudaha nidaamka ilaalinta xuquuqda qofka, wakiilka sharciga ah ee askariga, iyo soo-rogid anshax-marin isla marka natiijooyinka baadhitaanka gudaha lasoo gabagabeeyo. Xaaladda baadhitaanka dambiyeed ee la xidhiidha anshaxa askariga, xaaladdaas oo kale waxa lagu wareejin doonaa hay'ad kale oo sharci fulin ah, oo sida loo badinayo ah MN BCA. Baadhitaan gudaha ah oo gaar ah ayaa dhici kara isla mar ahaantaas ama ka dib gabagabada baadhitaanka dambiyeed oo dhab ahaan ugu tiirsan xaaladda cayiman. Xadgudubyada ama falalka siyaasadeed ee yar (sida imaanshaha xilli dambe shaqada, shilalka baabuurka ee kooxda booliska etc.), waxa ka dhalan doona nidaam ka rasmi ahaan yar oo diiradda saari doona tallaabada sixitaanka, tababarid, iyo/ama la talin loogu talagalay si looga hortago falalka noocan ah mustaqbalka.

Siyaasadda CPD: Booliska Eex-la'aanta ah

Hay'addayadu waxa ay ka filaysaa xubnaheeda in ay qabtaan waajibaadkooda iyaga oo aan eex ku samaynayn qof jinsiyadiisa, naafanimadiisa, jinsigiisa, jihadiisa galmada, diintiisa, iyo meelaha kale ee ilaashan. Askarta booliska Chaska waxa laga filayaa in ay ixtiraamaan oo ay taageeraan filashada dastuureed ee ah in dadka oo dhan ay lahaadaan ilaalin siman sida uu sharcigu dhigayo. Hay'adeenu waa ay cambaaraynaysaa oo ay mamnuucaysaa faaqidaada jinsiyadeed, qabiil, ama noocyada kale ee faaqidaada ah ee looga jeedo in si gaar ah loogu xadido ama loogu xadgudbo Xuquuqda Dastuureed ee qof leeyahay. (Eeg qoraalka dheeraadka ah ee u dambeeya ee 5).

Meelaha Ay ku Xoogan Tahay Siyaasadda Hadda

- ✓ **Qoondayn gaar ah oo la xidhiidha booliska eex-la'aanta**
- ✓ **Shuruudaha in la duubo macluumaadka jinsiyadeed markasta oo tallaabo fulin ah loo qaado ujeedooyin maamul kaliya si loo eego oo/ama loo baadho eedaymaha faaqidaada jinsiyadeed**
- ✓ **Dhisidda siyaasadda tixgelinta iyo daryeelka gaarka ah ee kuwa qaba xanuunka maskaxda, naafanimo, ama noocyo kale oo naafanimo ah**

Aagagga Isbedelka Suuragalka ah

- ✓ **Siyaasado kala soocan si loo fudaydiyo helitaanka iyo dib-u-eegista**
- ✓ **Ka helidda jawaab-celinta ururada iyo ashkhaasta ku salaysan bulshada maadaama oo ay suuragal tahay dib-u-eegis**

Booliska Eex-la'aanta ah: Macluumaad Dheeraad ah

<u>Miyaanu ku adeegsanaa faaqidaada Chaska?</u>

Jawaabta gaaban ee qeexani waa maya, taas oo ka turjumaysa waxqabadka booliska ee casriga ah iyo siyaasadaha heer gobol ee awoodda loo siiyey ee mamnucaya dhaqanada noocaas ah. Intaa waxa dheer, faaqidaada qaybta hay'adaha fulinta sharcigu waxa ay burbur ku tahay xidhiidhka iyo wada-shaqaynta booliska iyo bulshada, taas oo ah tiir ka mid ah waxyaabaha ay mudnaanta siiso CPD. Heer maamul, waxa aanu sidoo kale ururinaa xog ku saabsan la kulanka askartu ay la yeesheen dadweynaha guud ee

Ku salaysan jinsiyaddooda, intii lagu gudo jiray joogsiga gawaadhida iyo tallaabooyinka kale ee fulineed. Tani waxa ay faa'iido leedahay marka dib loo eegayo hawl-gudashada shaqaalaha iyo/ama cabashooyinka laga yaabo in loo qabtay wax la xidhiidha walaacyada faaqidaada ku salaysan jinsiga.

<u>Sidee baa aynu uga ilaalinaa askarta mid midka ah ku lug-lahaanshaha faaqidaada?</u>

Si loo xaqiijiyo in askarta mid midka ahi aanay ku lug-lahayn fal noociisu yahay faaqidaad, waxa muhiim ah in aynu ogaano aragtida wejiyada badan leh. Heer aasaasi ah, dhaqanka hay'addu waa qodob si laxaad leh kaalmeeye u ah markii hawsha faaqidaadu ay qayb ka tahay urur. Dhaqanka CPD ma muujiyo dhaqanadan heer kasta oo ay yihiin ururka dhexdiisa shaqaaluhuna waxa ay yihiin kuwo ay ka go'an tahay adeegyada amaanka bulshada ee macmiilka ku salaysan ee ah cadaaladda iyo eex la'aanta. Daryeel gaar ah inta lagu gudo jiro shaqaalaynta ka hor ee la xidhiidha hababka waraysiga, taariikhda shaqaalaha, iyo tababarka garoonka ayaa sidoo kale ah qodobo muhiim ah oo lagu hubinayo in tartamayaasha saxda ah uu ururku qaatay. Qaar ka mid ah tilmaamayaasha hordhaca ah ayaa laga yaabaa in ay ku jiraan taariikhda ama qiimaynta nafsiyadeed taas oo astaan u noqon karta saadaal in dhaqanka noocaas ahi ay u badan tahay in uu ka soo fulay tartame. Intaa waxa dheer, waxa muhiim ah in la ogaado kormeerka, tababarka, iyo dib-u-eegista hawl-gudashada askariga masuulka ah waxa ay sidoo kale muhiim u tahay hubinta falalka gaarka ah ee faaqidaadu in aanay dhacayn. Dedaalada dhamayska tiran ee guulaysta ee mid kasta oo ka mid ah aagaggan waa mudnaanta shaqaalahayaga taliska waxa aanay u dhacaan nidaam joogto ah.

Nidaamka CPD: Shuruucda Anshaxa

Waaxda booliska Chaska waxa maamula shuruucda gudaha ee siyaasadda Anshaxa, taas oo dhista heerarka anshaxa kuwaas oo la jaan-qaadaya hawl-galka iyo qiyamka hay'adda ee laga filayo xubnaheeda. Tallaabooyinka anshax-marin ee kasta oo ka dhan ah askarta ee ka soo baxaya xadgudubyada siyaasadan waa in loo baadhaa si waafaqsan sharciga gobolka iyo shuruudaha kale ee habraac. (Eeg qoraalka dheeraadka ah ee u dambeeya ee 6).

Eegitaan degdeg ah oo Shuruucda Anshaxa ah:

- ✓ **Dhamaan askarta fulinta sharcigu waa in ay si buuxda ula socdaan masuuliyadda anshaxeed ee kaalintooda waana in ay ugu dedaalaan si joogto ah in ay ku noolaadaan heerarka ugu sarreeya ee suuragalka ah ee xirfad-yaqaanimada booliska.**
- ✓ **Askariga booliska ahi waa in uu u qabtaa dhamaan waajibaadkiisa si eex-la'aan ah, iyada oo aanay jirin door-biditaan kalgacal ama niyad-xumo iyo iyada oo aanu tixgalineyn heerka, jinsiga, jinsiyadda, diinta, aragtida siyaasadeed ama hiigsiga. Dhamaan muwaadiniinta waxa loola dhaqmi doonaa si siman oo ay ku dheehan tahay xushmad, tixgelin iyo sharaf.**
- ✓ **Askariga booliska ahi weligii adeegsan maayo xoog aan daruuri ahayn ama xadgudub oo keliya waxa uu u isticmaali doonaa xooga noocaas ah ku gudashada waajibka hadba sidii macquul ah dhamaan duruufaha.**
- ✓ **Xooga waxa keliya ee la adeegsan karaa marka ay jirto is-xakameynta ugu weyn iyo keliya ka dib marka la arko in doodda, gorgortanka iyo qancintu aanay munaasab ahayn ama aanay wax ku ool ahayn. Marka adeegsiga xoogu uu marmar noqdo mid aan la iska ilaalin Karin, askari kasta oo boolis ahi waxa uu ka joogsan doonaa in uu dabaqo sababitaanka xanuunka iyo silcinta ee aan lagama maarmaanka ahayn waligiina ku lug-yeelan maayo in qofna loola dhaqmo si ah naxariis-darro, sharaf-darro ama bani-aadantinimada ka baxsan.**
- ✓ **Askartu waa in aanay si xun ula dhaqmin dadka xidhan. Askartu waa in ay ula tacaalaan dadkaas si waafaqsan sharciga iyo nidaamyada waaxda.**
- ✓ **Shaqo-wanaaga fulinta sharcigu waxa ay ku xidhan tahay ixtiraamka iyo kalsoonida bulshada. Anshaxa ku xadgudba ixtiraamkan iyo kalsoonidan waxa uu dhaawacayaa danta bulshada waana in la mamnuuco. Siyaasadda waaxdani waxa weeyi in ay baadho duruufta sheegaysa in askari uu ku lug yeeshay noqosho la'aanta mid anshax leh oo lagu soo rogo tallaabo anshax-marin ah markii ay tahay munaasab.**
- ✓ **Askarta booliska ahi waa in ay siiyaan qof kasta oo ka mid ah bulshadeena adeegyada sharci fulinta oo xirfadeed, wax ku ool ah, oo ku filan.**

Su’aalaha iyo jawaab-celinta qoran ku soo dir Email-ka:
communications@chaskamn.com

Wada Hadalka Bulshada Chaska
Arbacada 24 ka Juun 24, 2020 6:30gd-
8:30gd Xarunta Dhacdada Chaska

Booqo www.chaskamn.com/police wixii ku saabsan wacaasha ka soo korodha kulanka mustaqbalka